Oktoobar 23, 2020

Waalidiinta/Mas`uuliyiinta iyo Ardayda Dugsiga sare ee Qaaliga ahoow,

Tani waa akhbaar cusub oo muhiim u ah qoysaska wax ka barta dugsiga sare taasoo ku saabsan u kala wareegidda waxbarashada fasalka la xaadiraayo iyo kan maqalka iyo muuqaalka lagu dhigaaayo, iyo sidaa si lamid ah qaabka waxbarashada maqalka iyo muuqaalka ah ee loogu tala galay ardayda rajaynaysa in ay bilaabaan waxbarashada maqalka iyo muuqaalka ah ee Teeramka 2 aad.

Ayadoo in ka badan 18,000 oo arday hadda laga diiwaan galiyay Dugsiga Sare ee Maqalka iyo muuqaalka ah ee TDSB, ma qaabili karno arday dheeraad ah ayada oo aysan jirin dib u habayn weyn oo hanaanka lagu sameeyo — kaasoo ah shay saamayn aan wanaagsanayn ku yeelan kara dugsiyadeena fasalada la xaadiro sababayana in koorsooyin badan ay burburaan ama meesha laga saaro.

Hadafkeena ugu weyn waa in aanu ilaalino xasiloonida dugsiyada fasalada la xaadiro iyo Dugsiyada Maqalka iyo muuqaalka lagu dhigto labadaba, iyo in la sii wado bixinta koorsooyinka ay ardaydu u baahan yihiin. Ayada oo ay tani sabab u tahay, waxaanu baddali doonaa qaabka waxbarashada maqalka iyo muuqaalka ah lagu siiyo ardayda codsanaysa waxbarashada qaabka maqalka iyo muuqaalka ah ee Teeramka 2 aad.

**Ayada oo Dugsiga Maqalka iyo muuqaalka ah uu sii wadi doono in uu sii shaqeeyo taageerana siiyo ardayda hadda dhigata, ardayda jecel in ay ka badashaan waxbarashada fasalka la xaadirayo una badashaan waxbarashada maqalka iyo muuqaalka ah Teeramka 2 aad waxaa xulashada maqalka iyo muuqaalka ah ku qaabili doona dugsigooda ay hadda xaaadiraan.**

## Ka badalashada Waxbarashada Fasalka la tagaayo ayada oo loo baddalanaayo Waxbarashada Maqalka iyo muuqaalka ah

Ardayda ka diiwaan gashan dugsiyada fasalada la xaadiraayo kuwaas oo jeclaan lahaa in ay u badashaan qaabka maqalka iyo muuqaalka ah waxaa mucluumaad dheeraad ah siin doona dugsigooda, kaasoo ay kamid yihiin foom tusaya waxyaabaha ay jeclaan lahaayeen in ay sameeyaan. Isbaddalkaanu waxa uu dhaqan galaya bilowga Teeramka 2 aad ee Noofambar 23, 2020.

Qaabka waxbarashada maqalka iyo muuqaalka ah ee dugsiga ku salaysan ee dugsigaagu waa uu ku kala duwanaan karaa fasalba fasalka kale waxayna ku xirnaan doontaa qodobada sida tirada ardayda danaynaysa in ay wax ku bartaan qaabka maqalka iyo muuqaalka ah iyo koorsooyinka diyaarka ah. Mararka qaar, waxaa jiri doona arday ku filan in fasal dhan lagu bixiyo qaab maqal iyo muuqaal ah. Marar kale, fasalka waxaa loo kala jabin doonaa qaybo fasalka xaadiraysa iyo kuwo maqal iyo muuqaal ah.

Toronto District School Board

Dugsiyadu waxay diyaarin doonaan soona gabagabayn doonaan qaababka maalmaha soo socda, hadba sidii aan ku helno tiro caqli gal ah oo ah ardayda danaynaysa in ay wax ku bartaan qaabka maqalka iyo muuqaalka ah. Macluumaad khaas ah ayaa waxaa kula wadaagi doona madaxa dugsigaaga marka la gaaro biloowga Teeramka 2 aad. Fadlan ogoow in dhammaan codsiyada ka imaanaya ardayda jecel in u badashaan xulashada maqalka iyo muuqaalka ah ee dugsigooda ay dhigtaan waa la qaabili doono. Si kastaba ha ahaatee, xaaladaha qaarkood, isbaddallo lagu sameeyo koorsooyin la jeclaysto teeram gaar ah ayaa loo baahan karaa si loo waafajiyo helitaanka iyo bixinta koorsada.

**Ka baddalashada Dugsiga Maqalka iyo muuqaalka ah ayada oo loo baddalanaayo Waxbarashada Fasalka la xaadiraayo**

Ardayda hadda ka diiwaan gashan Dugsiga Maqalka iyo muuqaalka ah sidoo kalena jecel in ay ku laabtaan dugsigoodii fasalka la xaadiraayay waa in ay la xiriiraan la taliyaha hagaha ee dugsigooda fasalka la xaadiraayo marka la gaaro Oktoobar 28, 2020 si ay u arkaan in jadwal loo abuuri karo koorsooyinkaan gaarka ah ee ay codsadeen Teeramka 2, 3 iyo 4. Haddii jadwal la abuuri karo, baddalka dugsiga fasalka la xaadiraayo ayaa la fududayn doonaa. Fadlan ogoow in boosku xaddidnaan karo iskuul badelaaduna ay noqon karo mid aan suurto gal ahayn.

Haddii aad horey u samaysay codsiga in aad dib ugu laabato dugsigaagii aad fasalka xaadiraysay Teeramka 2 aad, fadlan mar labaad la xiriir dugsigaaga si aad u xaqiijiso codsiga.

Waad ku mahadsan tihiin dhammaantiin waalidiinta/mas`uuliyiinta iyo ardayda dulqaadkiina inta lagu guda jiro xaaladdaan wajiyada badan. Waxaanu samaynaynaa wax kasta oo aan awoodno si aan u qaabilno codsiyada ardayda anagoo xaqiijinaya xasiloonida sida ugu badan ee ugu macquulsan gudaha dhammaan fasalada iyo dugsiyada inta lagu guda jiro wakhtigaan cudurka safmarka ah.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, oo uu kujiro nooc tarjuman oo warqadaan ah maalmaha nagu soo aadan, fadlan bookho websaytkaTDSB.

Daacad kuu ah,

K. Witherow

Kathy Witherow
Agaasimaha Kumeel gaarka ah ee Waxbarashada